



Oktoobar 6, 2021

Waalidiinta/Wakiilada Mudan,

Wagtigaan lagu jiro oo dhaqaalaha aan la isku hubin oo weliba sii socda, waa inay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego (San Diego Unified School District) sii wado inay raadiso ilo maal-gelin oo suuragal ah si loo taageero shaqadeena muhiimka oo ah in ardaydeena loo diyaariyo guusha.

Impact Aid Funds waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo degmooyinka dugsiyada oo waayo lacagaha canshuurta oo sababteenu tahay ardayda u qoran oo ka imaado qoysaska ku nool ama ka shaqeeya dhismooyinka dawlada (federal properties) aan canshuurta laga qaadin ama ah kuwa ku jira milatariga. Waxaa dugsiyadeena si aad u saameeyo ardayda xiriirka la leh dawlada.

Impact Aid funds waa qayb ka mid ah miisaaniyada guud ee Degmada Dugsiga ay ku hawlgasho waxayna taageeraan hawlaha wax barashada oo loogu talagalay *dhamaan ardayda* jooga dugsi kasta.

Sida loogu qalmo maal-gelinta Impact Aid, Waaxda Wax Barashada Mareykanka (U.S. Department of Education) ayaa ka rabta Degmada Dugsiga inay sahamin ku sameeyo arday kasta si loo go'aamiyo u-qalmintaanka. Sidaa daraadeed waxaan ka codsaneynaa dhamaan waalidiinta inay buuxiyaan foomka sahaminta oo la socda warqadaan oo ay ku buuxiyaan maclumaad khuseeyo ilaa xiliga Oktoobar 6, 2021. Fadlan nagu caawi in aan u qalano maal-gelintaan muhimada badan.

Si lagu caawiyo:

- Hore ayaan maclumaadka ardayga ugu sii qorney foomka sahaminta.
- Hadii maclumaadku sax yahay, fadlan saxiix iyo taariikhda ku qoran foomka, oo sida ugu dhakhsaha badan u soo celi.
- Hadii loo baahdo saxitaan, fadlan xariiq mari maclumaad kasta aan sax ahayn markaas wixi saxitaan oo lagama-maamaan ah ku samey booska loogu talagalay. Fadlan waxaad meesha ama meelaha aad saxday ku qortaa labada xaraf oo bilowga u ah magacaaga hore iyo dambe (initial).
- Fadlan hubi in kuli sanduuqyada loo dhammaystiro iyadoo si buuxdo wax loogu faahfaahinaayo (loo-shaqeeyaha [employer], laanta [branch], qaybta [division], magaalada, gobolka, summada boostadaada [zip], iwm.)
- Fadlan ogoow: Loo-shaqeeyaha (employer) la mid ma aha **Dhismooyinka Dawlada (Federal Property)** (hoos ka fiiri tusaalaha ku qoran)
 - Ka shaqeeya Panda Express (**Loo-shaqeeyaha [Employer]**) oo ku yaalo 32nd St. Naval Base (**Dhismooyinka Dawlada [Federal Property]**)
- Waalidiinta ama wakiilada ku jira milatariga oona si buuxdo oga shaqeeya hadadaan (Actice Duty), fadlan sheeg Laanta Aad Ka Shaqeysid (Branch of Service) iyo Garaadada. Hadii aad ku jirtid **Reserves (Kaydka) ama National Guard (Difaaca Qaranka)** oo dawlada amar ku siiso oo lagugu hawl-gelinaayo, fadlan foomka soo raacsii koobiga amarka lagu soo siiyey. Waad madoobeen kartaa wixi maclumaad oo si shakhsiyan lagu garan karo waxaana maclumaadka noocaan loo yaqaanaa PIV (personally identifiable information).

Waan kaaga mahadcelineynaa wada shaqeynta aad nala shaqeyneyso oo aad si degdeg ah ku soo celineyso foomka oo dhammaystiran. Hadii ay bataan foomamka la soo celiyo, waxaa badaneyso lacagaha uu nidaamka dugsigeena heli karo. Hadaad qabto wax su'aal ah, fadlan la xiriir Pat McCoy 619-725-7593.

Si daacadnimo ah,

Lamont A. Jackson, Ph.D.
Koormeeraha Sare Ee Ku Meel-gaarka Ah